# Su'aalaha Wicitaanka Connector ee Bisha Luulyo 2025

## Su'aalaha

### Shatiga

- Dowladdu weli ma ka fiirsanaysaa in la oggolaado bixiyeyaasha C3 inay yeeshaan carruur dugsi dhigata oo ka badan?

  Jawaab: DCYF weli waxay ku jirtaa geeddi-socodka ururinta jawaab-celinta ku saabsan Qoraalka Labaad ee heerarka shatiga. Waxaan helnay jawaab-celin ballaaran oo ka timid daneeyayaal kala duwan, waxaana jawaab-celintaas loo adeegsan doonaa si loo qaabeeyo isbeddellada mustaqbalka ee heerarka shatiga. Sida hadda loogu qoray Qoraalka Labaad, shatiga C3 waxaa loo oggolaanayaa inuu haysto ugu badnaan 18 carruur ah, iyadoo aanay ka badnaan karin 10 ka mid ah carruurta aan weli dugsiga bilaabin.

- Ma sii wadi karnaa isticmaalka adeegsiga kaaliyeyaasha xarumaha daryeelka carruurta subaxdii iyo galabtii ?

- Jawaab: Sannadkii 2023, sharci-dejintu waxay ansixisay qodob sharciyeed ee oggolaanaya dabacsanaan dheeraad ah oo ku saabsan habka waqtig shaqaalaha imaatinka subaxnimo iyo bixitaanka galabnimol oo qaaybiyo. Qodobkani wuxuu ahaa inuu hirgalo 1-da Luulyo 2025; si kastaba ha ahaatee, sharci-dejinta 2025 waxay qodobkan ku darsatay sharciga (Minnesota Statutes, qaybta 142B.41, qayb-hoosaadka 14), iyadoo aan la socon taariikh hirgilin ah. Kaaliyayaa wuu baddali kara macallinka waqtiyada imaatinka subaxnimo ama bixitaanka galabnimo haddii waqtiga wadarta ah ee imaatinka iyo bixitaanka aanu ka badnayn boqolkiiba 25 saacadaha xarunta ay shaqayso maalintii. Kaaliyaha waa inuu ugu yaraan yahay 18 jir, kana shaqaynayay xarunta ugu yaraan 30 maalmood, isla markaana dhammeeyay dhammaan tababarrada hordhaca ah iyo dhammaan tababarrada looga baahanyahay sida ku xusan qaybta 142B.65 muddada 90ka maalmood ee ugu horreeya shaqadiisa. Eeg Shuruucda Minnesota, Cutubka 3, Qodobka 14, Qaybta 8.

- Carruurtu ma inay mar walba kabo xirtaan baa marka ay joogaan xarunta daryeelka carruurta?

  Jawaab: Ma jiro shuruud shatiyeed oo waajibinaysa in carruurtu mar walba xirtaan kabo marka ay joogaan xarunta daryeelka carruurta.

- Imisa saacadood oo tababbar ah ayaa sannadkii looga baahan yahay bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee qoysaska ee koox ahaan u adeega 12 carruur?

  Jawaab: Shuruudda tababbarka sannadlaha ah waa isku mid dhammaan noocyada shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska. Bixiyeyaasha waxaa looga baahan yahay inay dhammeeyaan 16 saacadood oo tababbar ah sannadkii.

- Xafiiska Kormeeraha Guud sidee buu u taageeraa xiriir wanaagsan ee ka dhexeeya shatigabixiyeyaasha iyo kuwa haysta shatiga si kor loogu qaado daryeelka carruurta ee qoysaska?

  Jawaab: Doorka ugu weyn ee kooxda shatiga ee Xafiiska Kormeeraha Guud (OIG) ee daryeelka carruurta ee qoysaska waa inay kormeeraan oo taageeraan nidaamka shatiga ee laga wakiishay degmooyinka gobolka oo dhan si loo hubiyo u hogaansanaanta sharciyada federaalka iyo kuwa gobolka, iyo si loo ilaaliyo caafimaadka iyo badqabka carruurta ku sugan daryeelka qoysaska. Waxaan siinaa la-hawlgalayaashayada shatiga ee degmooyinka tababbaro, la-talin, agabyo shatiyeed oo isku mid ah, waxaana si joogta ah ula shaqeynaa maalin kasta si aan kor ugu qaadno midnaanta iyo tayada. Sidoo kale, waxaan la shaqeynaa daneeyayaal kale oo ay ka mid yihiin bixiyeyaasha, sharci-dejiyeyaasha, Ombuds-ka Daryeelka Carruurta ee Qoysaska, iyo hay'ado kale. Kooxdu waxay sidoo kale si dhow ula shaqeysaa Waaxda Adeegyada Daryeelka Carruurta ee DCYF waxayna taageertaa barnaamijyada kor u qaadista awoodda sida barnaamijka Wayfinder/Navigator. Si kastaba ha ahaatee, ujeeddada ugu weyn ee shaqada OIG waa in la dhiirrigeliyo u hogaansanaanta shuruucda loona ilaaliyo caafimaadka iyo badbaadada carruurta ku sugan barnaamijyada haysta shatiga.

## DEED

- Barnaamijyada daryeelka carruurta sidee bay ku heli karaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fasaxa mushaarka leh ee qoyska?
- 

  Jawaab: Laga bilaabo Janaayo 2026, barnaamijka Fasaxa Mushaarka leh wuxuu u oggolaanayaa dadka ku nool Minnesota inay helaan waqti ay uga qeyb qaataan dhacdooyinka muhiimka ah ee nolosha — sida soo dhaweynta ilmaha, soo kabashada xanuun culus, ama daryeelidda qof qoyska ka tirsan. Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota (MN Department of Employment and Economic Development) waxay diyaarisay macluumaad loogu talagalay shaqo bixiyayaasha shaqsiyaadka iyo qoysaska, iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo adeegyada. Loo-shaqeeyayaashu waxay ka baran karaan doorkooda iyo waajibaadkooda, akhrisan karaan Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo (FAQ), sidoo kalena iska diiwaan gelin karaan si ay ula socdaan wararka cusub. sidoo kale Su'aalaha waxaa lagu soo gudbin karaa bogga sign up to stay informed.